markaana u dirno isla iimaylka ama lambarka ama lambarka aad na siisay. Waxaan u adeegsan karnaa cinwaannadan iimaylka ama lambarradan si aan kuugu dirno xusuusin ballamo, sahanno, ama macluumaad guud oo kale. Si kuugu sahlanaato, fariimahan waxaa laga yaabaa in la soo diro iyaga oo aan la qarin

Waxaa jira khataro gaar ah oo ku jira isgaarsiinta aan ammaan ahayn, sida in farriimaha ay qabtaan dad kale , in si qalad ah loo diro, in akoonno la isla wadagaayo , in farriimaha loo gudbiyo dad kale, ama in lagu kaydiyo qalab elektaroonig ah oo la qaadi karo oo aan ammaan ahayn. Adigoo adeegsanaya hababkan, waxaad aqoonsanaysaa oo aad oggolaanaysaa khatarahan. Qiimaha fariimaha iyo xogta internet-ka ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan fariimaha qoraalka ah ee aan kuu soo dirno, waxaadna heli doontaa fursad aad kaga bixi karto.

**Sida uu sharcigu farayo ama u oggol yahay:**
Waxaan isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga marka uu oggol yahay ama uu waajib ka dhigayo sharciga federaalka, kan gobolka, ama kan maxalliga ah.

**Suuq-geynta:**
Waxaan si fool-ka-fool kula wadaagi karnaa macluumaad ku saabsan badeecooyin ama adeegyo laga yaabo inaad xiiseynayso, ama waxaan ku siin karnaa hadyad dhiirrigelin ah oo qiimaheedu yar yahay. Haddii kale, uma isticmaalayno ama ma shaacin doono macluumaadkaaga anagoo leh ujeeddooyin suuq-geyn ah annaga oo aan helin oggolaanshahaaga.

## SHAACINTA XOGTA EE U BAAHAN OGGOLAANSHO QORAAL AH OO ADIGA KAA IMAANAYSO

**Sharciyo Kale oo Ilaaliya Macluumaadka Caafimaadka:**
OSharciyo kale ayaa laga yaabaa inay u baahdaan oggolaansho qoraal ah oo adiga kaa imaanaya si loo shaaciyo macluumaadkaaga ku saabsan caafimaadka maskaxda, daaweynta ku-tiirsanaanta walxaha/maandooriyaha (SUD), baaritaanka ama daaweynta cudurka HIV/AIDS, iyo baaritaanka hidde-sideyaasha. Waa inaan helnaa oggolaansho si loo isticmaalo loona shaaciyo diiwanada daaweynta caafimaadka dhimirka iyo iibinta macluumaadkaaga.

**Diiwaannada SUD:**
(Xad-gudubka Maandooriyaha): Haddii aan helno macluumaad la xiriira daaweynta SUD oo ay bixiyeen b bixiyeyaal ama xarumo gaar ah oo hoos yimaada xeerka 42 CFR Part 2, uma isticmaali karno mana la wadaagi karno macluumaadkaas baaritaannada ama dacwadaha madaniga ah, kuwa dembiyada, ama kuwa xeer-dejinta, iyado aan la helin oggolaanshahaaga qoraal ah oo hore ama amar maxkamadeed oo sax ah oo oggolaanaya shaacintaas, kaas oo sidoo kale ay weheliyo yeeritaanka maxkamadda ama dukumeenti kale oo waajib ka dhigaya shaacinta. Ka hor inta aysan maxkamaddu amrin in la shaaciyo macluumaadkaas SUD, sharcigu wuxuu dalbanayaa in lagu siiyo ogeysiis ku saabsan codsiga loo gudbiyay maxkamadda iyo fursad aad maxkamadda ugu gudbiso diidmadaada. Ma khuseyaan dhammaan macluumaadka SUD xannibaadahani.

sticmaalka iyo shaacinta xogta ee ka baxsan kuwa la oggol yahay waxaa la samayn doonaa oo keliya marka la haysto oggolaanshahaaga. Waad ka noqon kartaa oggolaanshahaas waqti kasta, adigoo soo qoraya si qoraal ah. Haddii aad ka noqoto oggolaanshahaaga, ma sii isticmaali doonno ama ma sii shaacin doonno macluumaadkaaga ujeeddooyinka lagu sheegay ka-noqoshada qoraalka ah; si kastaba ha ahaatee, shaacinno hore loo sameeyay oo ku salaysnaa oggolaanshahaaga ma saameyn doonaan.

## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir Multnomah County Privacy Manager, 619 NW 6th Ave., Dabaqa 9aad, Portland, OR 97209, ama wac 503-988-3674.

Multnomah County

**Waaxda Caafimaadka**

**www.mchealth.org**

*Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah waxay bixisaa fursadoloo siman yahay oo ku saabsan adeegyada iyo shaqaaleysiinta*



Multnomah County

**Waaxda Caafimaadka**

# OGEYSIISKA HABRAACYADA ASTURNAANTA

Ogeysiiskani wuxuu sharraxayaa sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo loona shaacin karo, iyo sida aad u heli karto macluumaadkan.

## FADLAN SI TAXADDAR LEH U EEG

***Ogeysiiskani wuxuu sharraxayaa habraacyada asturnaanta ee Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah.*** *Sharcigu wuxuu na farayaa inaan ilaalinno asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo ("Macluumaadka"), isla markaana aan ku siino ogeysiiskan. Waxaa nalagu waajibiyay inaan raacno shuruudaha ogeysiiskan hadda dhaqan-galka ah. Ogeysiiskani wuxuu dhaqan-galayaa Febraayo 16, 2026. Waxaan xaq u leenahay inaan wax ka beddelno ogeysiiskan. Wax ka beddel kasta wuxuu khuseyn doonaa macluumaadka aan horey kaaga haynay. Nuqulka hadda shaqaynaya ee ogeysiiskan waxaan ku dhejin doonnaa goobaha adeegyada lagu bixiyo, sidoo kale waxa lugu daabici doonaa bogga internetka: www.multco.us/hipaa.*

## XUQUUQDAADA

**Inaad Baarto oo Nuqul ka Diyaarsato:**
Waxaad xaq u leedahay inaad baarto ama aad nuqul ka diyaarsato Macluumaadkaaga ku jira "diiwaankaaga gaarka ah". "Diiwaan gaar ah" waa diiwaanno la isku geeyey oo loo isticmaalo in go'aanno kugu saabsan lagu gaaro. Mararka qaarkood, waxaan xaddidi karnaa Macluumaadka aad baari karto ama aad nuqul ka diyaarsan karto xaalado gaar ah oo kooban. Haddii aan xaddidno xaqaaga aad ku baari karto ama aad nuqul ka diyaarsan karto, waxaad qoraal ahaan ku codsan kartaa in go'aankaas dib loo eego. Nuqullo ka mid ah diiwaannada aya lagu siin karaa ama cid saddexaad aya la siin oo aad adigu tilmaamto, iyadoo loo eegayo qaab elektaroonig ah ama mid warqad ah, taas oo ku xiran odsigaaga iyo tignoolajiyada lagu hayo diiwaannada. Codsigaagu waa inuu noqdaa mid qoraal ah. Waxaan kaa caawin karnaa inaad diyaarsato codsi qoraal ah. Waxaan kaa qaadi karnaa khidmada nuqulada.

**Saxidda ama wax ka beddelidda:**
Waxaad xaq u leedahay inaad naga codsato inaan wax ka beddelno qaar ka mid ah Macluumaadka ku jira diiwaankaaga gaarka ah haddii aad aaminsan tahay inuu khaldan yahay ama uusan dhammaystirnayn. Codsigaagu waa inuu noqdaa mid qoraal ah, waana inuu ku caddeeyaa sababta codsiga. Waxaan kaa caawin karnaa inaad diyaarsato codsi qoraal ah. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku ogeysiin doonnaa qoraal ahaan,adiguna waxaad xaq u leedahay inaad ka jawaabto diidmadaas. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in codsigaaga, diidmada, iyo bayaanka diidmada (haddii uu jiro), lagu daro nuqullada mustaqbalka laga bixinayo diiwaankaaga.

**Diiwaanka Xog-bixinta:**
Waxaad xaq u leedahay inaad codsato liiska xog-bixinnada qaarkood ee la xiriira Macluumaadkaaga ku jira diiwaankaaga gaarka ah. Liisku kuma jiri doono shaacinta loo sameeyay daaweyn, lacag-bixin, ama hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo sidoo kale shaacinta adiga laguu sameeyay ama shaqsiyaadka ku lugta leh daryeelkaaga ama bixinta kharashka daryeelka. Sidoo kale, kuma jiri doonaan shaacinnada la sameeyay 6 sano ka hor taariikhda codsiga, kuwa ku yimid oggolaansho, kuwa qaybta ka ah xog-ururin xaddidan, kuwa loo diray xarun asluub, shaacinnada ku dhacay si kadis ah, shaacinnada loo sameeyay amniga qaranka ama sirdoonka, ama shaacinnada la sameeyay ka hor 14-ka Abriil, 2003. Codsigaagu waa inuu noqdaa mid qoraal ah. Waxaan kaa caawin karnaa inaad diyaarsato codsi qoraal ah. Waxaan kugu soo dallici karnaa khidmad haddii aad codsato liiska in ka badan hal jeer 12-kii biloodba.

**Xaddidaadyo:**
Waxaad xaq u leedahay inaad naga codsato in la xaddido sida Macluumaadkaaga loo isticmaalo ama loo shaaciyo. Kuma khasbanin inaan aqbalno codsigaaga,sidoo kalena mararka qaarkood ma awoodi karno inaan sidaas sameyno, marka laga reebo hal xaalad oo gaar ah. Waxaad codsan kartaa in Macluumaadkaaga aan lala wadaagin qorshe caymis caafimaad marka adiga ama qof adiga ku metelaya aad si buuxda u bixisaan kharashka adeegga, isla

markaana isticmaalka ama shaacintu ay ku saabsan tahay lacag-bixin ama hawlaha daryeelka caafimaadka, ayna sharci ahaan qasab ahayn. Codsigaagu waa inuu noqdaa mid qoraal ah. Waxaan kaa caawin karnaa inaad diyaarsato codsi qoraal ah.

**Xiriirka Qarsoodiga ah:**
Waxaad xaq u leedahay inaad naga codsato inaan kugula xiriirno goob cayiman ama hab gaar ah. Waa inaad caddeysaa sida ama meesha aad rabto in lagugula soo xiriiro. Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa inaan kugula xiriirno oo keliya adigoo jooga goobtaada shaqada. Waan tixgelin doonnaa codsi kasta oo macquul ah.

**Ogeysiis:**
Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul warqad ah oo ogeysiiskan ah marka aad codsato. Ogeysiiskan waxaa lagu heli karaa luuqado kale iyo qaabab kale duwan.

**Ogeysiiska Jebinta Asturnaanta Macluumaadka:**
Waxaad xaq u leedahay in lagugu soo ogeysiiyo haddii aan ogaanno in la jebiyey amniga macluumaadkaaga aan la dammaanad qaadin.

**Cabashooyinka:**
Waxaad xaq u leedahay inaad gudbiso cabasho haddii aad aaminsan tahay inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada asturnaanta. Waxaad cabasho u gudbin kartaa Sarkaalkayaga Asturnaanta ama Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada ee Mareykanka. Kaama aargoosan doonno, mana kula dhaqmi doonno si xun, gudbinta cabashadda awgeed.

## SIDAA AAN U ISTICMAALI KARNO UNA SHAACIN KARNO MACLUUMAADKAAGA IYADA OO AAN OGGOLAANSHO LAGAAGA HELIN

HIPAA si toos ah wuxuu u khuseeyaa oo keliya hay'adaha uu sharcigu daboolayo ee HIPAA, sida bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee soo gudbiya kharashyada caymiska. Markaan shaacinno macluumaadkaaga, waxaa dhici karta in qofka helay uu sii shaaciyo, markaasna xogtaas ma sii hoos imaanayso xeerka HIPAA.

**Daaweynta:**
Waxaan u isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa macluumaadkaaga si waafaqsan sida lagama maarmaanka u ah si aan kuugu siinno daryeel iyo adeegyo caafimaad. Tusaale ahaan, waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ee ku lugta leh daryeelkaagat.

**acag-bixinta:**
Waxaan u isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa macluumaadkaaga si aan biil u dirno ama aan u helno lacag-bixinta adeegyada lagu siiyay. Tusaale ahaan, si loo gudbiyo codsiyada lacag-bixinta.

**Hawlaha Daryeelka Caafimaadka:**
Waxaan u adeegsan karnaa ama u shaacin karnaa Macluumaadkaaga hawlaha daryeelka caafimaadka ee hay'adda. Tusaale ahaan, waxaan u adeegsan karnaa Macluumaadkaaga hawlaha qiimeynta iyo horumarinta tayada, iyo sidoo kale adeegyada maareynta kiisaska.

**Habaynta Isku-duwidda Daryeelka Caafimaadka:**
Waxaan qayb ka nahay habaynta isku-duwidda daryeelka caafimaadka (Organized Health Care Arrangements, OHCA), sida Xogta Caafimaadka ee Elektaroonigga ah Shabakadda Macluumaadka Caafimaadka Bulshada ee Oregon (Oregon Community Health Information Network, OCHIN), waxaana u isticmaali karnaa ama la wadagi karnaa macluumaadkaaga xubnaha habayntaas sameynayo sida uu oggol yahay Sharciga Caymiska iyo o Isla-xisaabtanka Caafimaadka (HIPAA). Xaaladaha qaar, waxaan isticmaalnaa nidaamyada iyo adeegyada xubnaha OHCA si aan u maareeyno xogta caafimaadka ee elektaroonigga ah iyo isku-duwidda gudbinta daryeelka. Waxaan la wadaagi karnaa Macluumaadkaaga xubnaha OHCA si loogu fuliyo hawlaha wadajirka ah ee daryeelka caafimaadka ee OHCA.

**Shakhsiyaadka ku lug leh Daryeelkaaga ama Lacag-bixinta Daryeelkaaga:**
Waxaan macluumaadkaaga la wadaagi karnaa qoyskaaga, wakiilkaaga gaarka ah ama dadka kale ee ku lug leh daryeelkaaga ama lacag-bixinta daryeelkaaga, haddii aad bixiso oggolaansho afka ah ama haddii kale aadan ka soo horjeesan. Haddii aadan awoodin inaad adigu gaarto go'aan daryeel caafimaad, waxaan u shaacin karnaa macluumaadkaaga sida lagama maarmaanka ah haddii aan aaminsannahay inay ku jirto dantaada.

**Hawlaha Caafimaadka Dadweynaha:**
Waxaan u adeegsan karnaa ama u shaacin karnaa Macluumaadkaaga hawlaha caafimaadka dadweynaha. Tusaale ahaan, shaacinta loo sameeyo ujeeddooyinka ka hortagga ama xakameynta cudurrada, dhaawaca, naafannimada, xadgudubka, ama dayacaadda. Hawlahan waxaa ka mid ah hawlaha ay qabtaan adeegyada ku-deeqidda iyo ku-tallaalidda xubnaha ama unugyada jirka, hawlaha ay qabtaan baareyaasha dhimashada, agaasimayaasha caafimaadka, iyo agaasimayaasha aaska, iyo sidoo kale hawlaha lagama maarmaanka u ah in laga hortago khatar halis ah oo degdeg ah oo ku wajahan caafimaadka iyo badbaadadaada ama kuwa kale.

**Hawlaha Kormeerka Caafimaadka:**
Waxaan la wadaagi karnaa macluumaadkaaga hay'ad kormeerka caafimaadka qaabilsan. Hawlahan waxaa ka mid ah hantidhawrka iyo kormeerka ay dawladdu ku samayso si ay u kormeerto nidaamka daryeelka caafimaadka.

**Dacwadaha Sharciga ah:**
Waxaan shaacin karnaa macluumaadkaaga annagoo ka jawaabayna amar maxkamadeed, yeeritaanka markhaatiga, codsiga soo bandhigidda xogta dacwada, hawlaha la xiriira gunnooyinka magdhowga shaqaalaha, ama ujeeddooyin kale oo sharci ah.

**Fulinta Sharciga:**
Waxaan macluumaadkaaga la wadaagi karnaa booliska ama dadka kale ee fuliya sharciga marka shaacintaan uu oggol yahay ama uu dalbado sharcigu. Waxaan macluumaadkaaga la wadaagi karnaa si aan uga warbixinno dembi ka dhacay goobtayada.

**Cilmi-baaris:**
Xaalado gaar ah, waxaan u adeegsan karnaa ama u shaacin karnaa Macluumaadkaaga cilmi-baaris ay ansixiyeen Guddiga Dib-u-eegista Hay'adda ama Guddiga Asturnaanta, ama iyadoo la adeegsanayo oggolaansho aad adigu saxiixday.

**Maxaabiista:**
Haddii aad tahay maxbuus ku jira xabsi ama jeel, ama aad ku hoos jirto haynta sharciga ah ee fulinta sharciga, waxaan shaacin karnaa Macluumaadkaaga sida sharcigu u farayo ama u oggol yahay.

**Wada-shaqeeyayaasha Ganacsiga:**
Xaalado gaar ah, waxaa laga yaabaa inaan u baahanno inaan macluumaadkaaga la wadaagno wada-shaqeeyayaasha ganacsiga, sida turjumaanka ama qof dib-u-eegis ku sameeya tayada shaqada, si uu noogu qabto adeeggeena. Waxaan heshiis qoran la geli doonnaa wada-shaqeeyaha ganacsiga, kaas oo looga baahan yahay inuu u ilaaliyo sirta Macluumaadkaaga si la mid ah nidaamka ilaalinta sirta ee aanaga aan bixinno.

**Ciidanka iyo Amniga Qaranka:**
Waxaan shaacin karnaa Macluumaadkaaga sida ay u baahan yihiin shaqaalaha ciidamada qalabka sida, ama si loogu gudbiyo mas'uuliyiin federaal ah oo loo oggolaaday hawlaha amniga qaranka iyo sirdoonka.

**Gurmadka iyo Dadaallada Gargaarka Musiibooyinka:**
Haddii aadan ka hor imaan, waxaan shaacin karnaa Macluumaadkaaga bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ama hay'ad ka qayb qaadanaysa dadaallada gurmadka musiibooyinka si loo isku-duwo daryeelka. Waxaan shaacin karnaa Macluumaadkaaga haddii ay lagama maarmaan noqoto si aan u aqoonsanno loo helo, loona wargeliyo xubnaha qoyska, masuuliyiinta, ama, ama dadka kale ee mas'uulka ka ah daryeelkaaga, goobta aad ku sugan tahay, xaaladdaada, ama geeridaada.

**Xog-ururin Xaddidan:**
Waxaan la wadaagi karnaa Macluumaadkaaga xaddidan cid saddexaad iyaadoo loo adeegsanayo ujeedooyin cilmi-baarista, caafimaadka dadweynaha, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Shaacintani kuma jiri doonto wax Macluumaad ah oo si toos ah laguugu aqoonsan karo. Cid kasta oo saddexaad ama hay'ad kasta oo hesha xog xaddidan waa inuu saxiixaa heshiis si uu u ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaad.

**Shaacinta Xogta ee Lama-filaanka ah:**
Shaacinta macluumaadkaaga oo si lama-filaan ah u dhacda waxay dhici karaan iyadoo ka dhalata isticmaal iyo wadaagid sharci ahaan la oggol yahay. Tusaale ahaan, qof soo booqday goobta adeegga ayaa laga yaabaa inuu si kedis ah u maqlo magacaaga oo laga dhex yeerayo aagga sugitaanka.

**Isgaarsiinta:**
Haddii aad doorato inaad nala soo xiriirto adigoo adeegsanaya habab aan ammaan ahayn, sida iimayl caadi ah ama farriin qoraal ah, waxaan kuugu jawaabi karnaa isla habkaas isla